REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF..... DATE :.....

Sharci No: 93/96

Tar: November 3, 1996
H a r g e y s a

Sharciga Dhismaha Ciidanka Asluubta

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

MARKUU ARKAY: Qodobka 14aad xubintiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo Qodobka 24aad ee Axdi Qarameedka JSL.

MARKUU Tixgeliyey: Baahida loo qabo dhismaha Ciidanka Asluubta.

MARKUU Aqoonsaday: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaalada iyo.

MARKUU HELAY: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada JSL.

MARKUU HELAY: Ogolaanshaha Golaha Wakiilada

Qodobka 1aad (Dhismaha Ciidanka)

1. Ciidanka Asluubta waa qeyb ka mid ah ciidamada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Somaliland ku meel gaadh ahaan.
2. Ciidanka Asluubta wuxuu si toos ah u hoos imanayaa dhisme ahaan,iyo markuu shaqadiisa caadiga ah hayo Wasaarada Caddaaladda.

Qodobka 2aad (Waajibaadka Ciidanka Asluubta)

Waajibaadka Ciidanka Asluubta waa:-

b. Ilaalinta Xabsiyada,
t. Dib u bulsheynta dambiilayaasha,
j. Barbaarinta Agoomaha,
x. Lahaansho awood militiri markii looga baahdo ama looga yeedho difaaca qaranka. Iyo dhamaan hawlihii kale ee sharcigu u xilsaaro.

Qodobka 3aad (Hoggaaminta Ciidanka)

Hoggaaminta sare ee Ciidanka waa:-

b. Taliyaha Ciidanka Asluubta.
t. Taliye Xigeenka Ciidanka Asluubta,

2. Taliyaha Ciidanka Asluubta iyo Taliye Xigeenka Ciidanka Asluubta waxaa magacaabaya Madaxweynaha, ka dib markuu dhageystey talo soo jeedinta Wasiirka Caddaaladda.
3. Taliyaha Ciidanka waxaa laga soo dhex xulanayaa saraakiisha Ciidanka Asluubta ama Ciidamada kale ee Dawlada, taliye xigeenka ciidanka waxaa laga xulayaa saraakiisha ciidanka asluubta ee aqoonta u leh cilmiga xabsiyada (penologi and corrections).

Qodobka 4aad (Awooda Wasiirka Caddaaladda)

Marka laga reebo amarada uu bixin karo Madaxweynuhu Wasiirka Caddaaladdu wuxuu soo saari karaa awaamiir tilmaameysa hawsha ciidanka asluubta.

Qodobka 5aad (Awooda Taliyaha Ciidanka Asluubta)

Taliyaha Ciidanka Asluubtu isagoo fulinaaya amarka Madaxweynaha iyo Wasiirka Caddaaladda wuxuu soo saari karaa Awaamiirta joogtada ah oo shaqada Ciidanka hagaysa.

Qodobka 6aad (Hanaanka Ciidanka)

1. Ciidanku wuxuu lahaanayaa talis guud oo fadhigiisu yahay magaalo madaxda, wuxuuna gobolada iyo degmooyinka ku ahaanayaa fadhiyo xabsi oo kala duwan.

2. Iyadoo la doonaayo qaab-dhismeedka hagaagsan ee Ciidanka, taliyaha Ciidanka Asluubta wuxuu soo jeedinayaa waqti ka waqti habka ugu haboon ee shaqada Ciidanka ku toosi karto, waxaana oggolaanaya Wasiirka Caddaaladda.

Qodobka 7aad (kala horeynta Ciidanka)

Ciidanku wuxuu lahaanayaa derejo tilmaameysa habka kala sareynta Ciidanka oo lagu soo saari doono xeer Madaxweyne waxeyna salka ku hayn doontaa:-

b. Saraakiil Sare,
t. Saraakiil Hoose,
j. Kormeerayaal,
x. S/xigeen,
kh. Dabley,
d. Layli dable.

Qodobka 8aad (Calaamadaha Labiska & Hubka Ciidanka)

1. Calaamadaha iyo derejada Ciidanka Asluubta waxa lagu sheegi doonaa xeer-Madaxweyne iyadoo uu sidaas soo jeediyey taliyaha Ciidanka Asluubtu, lana dhageystey Wasiirka Caddaaladda.
2. Ciidanku wuxuu lahaanayaa labis u gaar ah ama wuxuu la wadaagi karaa labisyada kale ee Ciidamada Dawladda.
3. Ciidanku markuu shaqada hayo wuxuu sidan karaa hub iyo rasaas, goorta iyo habkuu tilmaamo Taliyaha Ciidanku isagoo ka talo qaadanaya Wasiirka Caddaaladda.

Qodobka 9aad (ku dhaqida Ciidanka Asluubta xeer-nidaamiyaha Ciidanka Booliska)

1. Ciidanka Asluubtu waxay la wadaagaan xeer nidaamiyaha Ciidan Booliska marka loo eego qeybahan soo socda:-

   B. Dalacaada Ciidanka,
   T. Fasaxa, mushaaharka & xaladaha xubnaha,
   J. Asluubta,
   X. Awoodaha & habka,
   Kh. Gefefka Asluubta,
   D. Ciqaabta & racfaanka,
   R. Abaal marinta.

2. Xaaladaha kale oo dhan, waxay lahaanayaan Xeer-Nidaamiye u gaar ah.

Qodobka 10aad (Raad raacidda go'aanadii hore ee Taliyaha)

Go'aan kasta oo uu qaatay taliyaha ama sarkaal kale ka hor intaanu sharcigan hirgelin oo la xidhiidha xaaladaha shaqada iyo arrimaha Ciidanka, waxaa loo qaadanayaa sharci, haddii ay tallaabooyinkaasi waafaqsan yihiin hab raaca sharcigan.

Qodobka 11aad (Tirtir)

Waxaa la tir-tir sharci kasta iyo qodob kasta ee sharci kasta oo aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 12aad (Dhaqan-galka)

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa markuu Madaxweynuhu Saxeexo.

(Maxamed Ibraahim Cigaal)
Madaxweynaha JSL

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

GOLAHA WAKIILADA JAM. SOMALILAND

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES

Date: GO/ GO-80 /96.
REF : 14-10-96

GOLAHA WAKIILADDA

MARKUU ARKAY = Qodobka 11 aad qaybtiisa (T) Farqadiisa 1aad ee Axdigga Qaranka:-

Markuu arkay = Baahidda loo qabo dhismaha Ciidanka Asluubta.

MARKUU ARKAY = Soo Jeedinta Golaha Xukuumadda

GOLUHU WUXUU ANSIXIYEY SHARCIGGA DHISMAHA CIIDANKA ASLUUBTA NO. YAHAY 83/96.-

Haddaba Goluhu wuxuu sidiisa u ansixiyey sharcigga kor ku xusan oo ka kooban 12 Qodob iyo laba bog:-

GOLAHA WAKIILADDA JAM

(Farsal Axmed Maxamed)
=XOGHAYAHA GOLAHA WAKIILADDA=